WIXII KA DAMBEEYEY XAYIRAADDA LAGU SOO ROGAY MUSLIMIINTA OGSOONOOW XUQUUQDAADA

Halkan waxaan ku xuseynaa waxyaabaha aad sameyn karto haddii ay boliiska, saraakiisha socdaalka, ama FBI kuu yimaadaan.

Xayiraadda Muslimiinta waa qeybka mid ah bar tilmaaeedka uu ka dhigtay maamulka Trump dadka muslimiinta, Carabta, Iiraaniyiinta, Bariga Dhexe iyo bulshada ka sii jeedda Koonfurta eeshiya Waa in adiga iyo bulshada kale aad ogsoon tihiin waxyaabaha aad xaquuqda u leedihiin.

Macluumaadkan looma jeedo talo xagga sharciga ah. Sharciyada goboladu way kala duwanaan karaan. Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xad gudbay ama dooneyso macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriir xafiiska ACLU ee magaaladaada www.ACLU.org/affiliates

Waxaa la dhameystiray 10/11/2017

XUQUUQDAADA IYO MAS'UULIYADDA KU SAARAN MARKA AAD LA HADLEYSO BOLIISKA, SARAAKIISHA SOCDAALKA IYO FBI:

- Waxa aad xaq leedahay in aad iska aamusnaato. haddii aad dooneyso sidaas, cod dheer ku dher "waxa aan doortay in aan iska aamusnaado."
- Waxa aad xaq u leedahay in aadan ogolaan in adiga iyo alaabadaada la baaro.
- Weydii haddii aad xor tahay oo aad iska bixi karto. Haddii ay ku yiraahdaan haa, adiga oo degan oo aamusan iska tag.
- Haddii lagu xiro, weydiiso in aad qareen la hadasho markiiba oo ku adkeyso xaqa aad u leedahay in aad aamusnaato.
- Gacmahaaga markasta waa in ciidanku arkayaan
- Ha cararin, ha is adkeyn oo boliiska haka hor istaagan hawshooda xitaa haddii aadan wx dambi ah gelin ama boliisku ku xad gudbaan xuquuqdaada.
- Baan ha sheegin ama saraakiisha ha siin aqoonsi been abuur ah, oo ay ka mid yihiin sharciga aad wadanka ku joogto.
- Iyada oo aan loo eegin sharciga aad wadanka ku joogto, dastuurka ayaa xuquuq ku siinaya.

Haddii ay kuu yimaadaan saraakiisha socdaalka (ICE ama CBP) adiga oo wadada maraya ama banaanka jooga (soo galaya ama ka baxaya Mareykanka s

- **Dadka Heysta Dhalashada Mareykanka** Waajib kuma aha in aad tusto cadeyn muujineysa in aad heysato dhalashada Mareykanka ama aad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan halka aad ku dhalatay ama sida aad ku soo gashay Mareykanka. Waxa aad kale oo aad dhihi kartaa in aad dooneyso in aad iska aamusnaato.
- **Dadka Aan Heysan Dhalashada Mareykanka** Haddii uu sarkaal kaa codsado aqoonsigaaga sharciga oo aad heyso, tus sarkaalka. Haddii aadan heysan, u sheeg in aad dooneyso in aad iska aamusnaato. **Fiiro gaar ah:** (Sharciyo u gaar ahaa ayaa jira xuduudaha caalamiga ah iyo gegida diyaaradaha, iyo dadka heysta noocyada gaar ah ee dal ku galka dadka soo haajira, oo ay ka mid yihiin kuwa dalxiiska iyo ganacsatada. Fadlan la xiriir xafiiska ACLU si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Haddii FBI ay doonayaan in ay su'aalo ku weydiiyaan ama ku wareystaan:

- Waxa aad xaq u leedahay in aad diidi karto in lagu wareysto.
- Waajib kuguma aha in aad ka jawaabto su'aal kasta, xitaa haddii ay heystaan amar maxkameed.
- Ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha ama aan lagu wareysan, waxa aad xaqu leedahay in aad qareen lahadasho oo qareen uu goob joog ka ahaado.
- Xitaa haddii aadan khalad sameyn, waxaa wanaagsan in qareen ku wehliyo.

Haddii boliiska, FBI ama saraakiisha socdaalka yimaadaan gurigaaga:

- Weydii in ay ku tusaan haddii ay heystaan amar maxkamadeed. Khasab kuguma aha in aad u ogolaato in ay gurigaaga soo galaan ilaa ay heystaan amar maxkamadeed oo qaali uu saxiixay.
- Waxaa laga yaabaa in saraakiisha socdaalku (ICE) wataan amarmaxkamadeed ama amar maxkameed oo lagu soo xirayo qof laakiin uusan qaali saxiixin. Haddii uu qoraalka saxiixay sarkaala ICE ka tirsan ama horjooge, laakiin uusan qaali saxiixin, waajib kuguma aha in aad u ogolaato in ay gurigaaga so galaan ama aad la hadasho.
- Haddii ay heystaan ogolaashaha maxkamadda.oo qaali saxiixay.
    - Weli waajib kuguma aha in aad la hadasho ama waxaa laga yaabaa in aad dooneyso in aad la tashato qareen ka hor inta aadan go'aansan in aad la hadasho. Haddii aad doorato in aad la hadasho, guriga dibadda uga soo bax oo xir (hadii aysan heysan amar baaritaan ah oo guriga ay ku galaan).
    - Amar soo xiritaan ah oo qaali saxiixay waxa ay u ogolaaneysaa in ay guriga geli karaan haddii ay aaminsan yihiin in qofka la amray in la soo xiro uu ku jiro guriga.
    - amar maxkameed oo lagu baarayo oo qaali saxiixay waxa uu u ogolaanayaa in ay galaan meelo gaar ah oo ay ka raadiyaan waxyaabaha ay raadinayaan ee ku xusan amarka.

Haddii aad ku soo noqoneyso Mareykanka oo ka soo galeyso gegida dayuuradaha ama xuduudda caalamiga ah:

- Saraakiisha xuduuddu way ku joojin karaan iyaga oo baaray alaabadaada, xitaa haadii uusan jirin wax laga shakiyo. Hase yeeshee, bar tilmaameed kaama dhigan karaan iyaga oo ku saleynaya diintaada, midabkaaga, qowmiyadda, halka qofku asal ahaan ka soo jeedo, jinsiga, ama waxyaabaha qofku aamisan yahay.
- Su'aalaha ku saabsan sharciga aad wadanka ku joogto:
    - Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka oo aad tusto baasaboor, waajib kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha, inkasta oo diidmada ka jawaabista su'aalaha la xiriira ujeedada safarkaaga keeni karto dib u dhac iyo baaritaan dheeraad ah.
    - Haddii aadan heysan dhalashada Mareykanka, oo aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha, waxa ay kuu diidi karaan in ay kuu ogolaadaan in aad waddanka soo gasho. Haddii aad doorato in aad ka jawaabto su'aalaha, runta sheeg.
- Su'aalaha ku saabsan diintaada iyo sida aad ugu dhaqanto ama dhinaca aad raacsan tahay siyaasadda. Khasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha. Waxa aad codsan kartaa in aad aragto horjooge haddii ay sii wadaan su'aalahaas.
- Codsiyada ah in ay baaraan qalabka elektaroonigga ah sida kombiyuutarada iyo telefoonka gacanta: Haddii uu sarkaalku awood u leeyahay inuu baaro waxyaabaha ku jira qalabkaaga elektaroonigga ah iyada oo uusan jirin wax tuhun ah ama amar maxkamadeed waa arrin dood ka taagan tahay.
    - Waa aad diidi kartaa in aad bixiso erayga sirta ah ama aad u furto qalabka, laakiin taasi waxa ay keeni kartaa dib u dhac, su'aalo muddo dheer lagu hayo, in qalabkaaga lagaa hayo ilaa lagusameeyo baaritaan dheeraad ah.

- **Dadka Heysta Dhalashada Mareykanka** Laguuma diidi karo in aad waddanka soo gasho haddii aad diido in aad bixiso macluumaadkaas.
- **Dadka Aan Heysan Dhalashada Mareykanka** Waxaa suiurogal ah in haddii aadan bixin macluumaadkaas ay keeni karto in laguugu diido in aad waddanka soo gasho.